


Inta badan dadku waxay leeyihii labo kelyood, oo mid kasta le'eg tahay xajmiga feerka qof wayn, oo ku yaala labada gees ee araxda oo ka hooseeya feeraha. Inkastoo ay yar yihiin, kelyahaaga ayaa qabta shaqooyin badan oo isku dhafan kuwaasoo isku dheelitira qaybaha kale ee jirka. Tusaale, kelyaha:

-  Waxay gacan ka gaystaan ka saarida jirka qashinka iyo dheecaanka dheeriga ah
-  Waxay sifeeyaan dhiiga, ayagoo reeba qaybaha nadiifta ah qashinkana ka saara jirka
-  Waxay xakameeyaan soo saarista unugyada dhiiga cas
-  Waxay abuuraan feetamiinnada xakameeya kobaca
-  Waxay siidaayaan hoormoonnada naga caawiya maamulida cadaadiska dhiiga
-  Waxay gacan ka gaystaan xakamaynta cadaadiska dhiiga, unugyada dhiiga cas, iyo cadadka nafaqooyinka ku jira jirka, sida kaalshiyaamka iyo bootaasiyaamka

Kelyaha Caafimaadka Qaba

30 daqiqo kastaba
kelyuhu waxay sifeeyaa
dhammaan dhiiga ku
jira jirka!



1
Lagasoo bilaabo xalfaafyada, dhiiga ayaa gala

kelyaha kadibna sii mara malaayiin qaybahaa dhiiga sifeeya ah oo loo yaqaano glomeruli ("glow-mare-you-lie").

Unugyada
Dhiiga
Qashinka

Glomerulus Balaartay

2

Glomeruli ayaa sheegi kara

farciga u dhexeeya wax aad u baahan tahay iyo wax aadan u baahnay. Waxay qashinka iyo dheecaanka dheeriga ah ka saaran dhiiga si ay kaadi u noqdaan.

3

Tuubooyin loo yaqaano tuubooyinka kaadi haysta

aya kaadida geeya kaadi haysta. Kaadida ayaa meesha laga saaraa marka aad kaadido ("biyo kasoo baxaaya jirka," "oo lagu dhigo musqusha").

Sidaan ayay kelyuhu u qabtaan shaqadooda muhiimka ah:

1. Dhiiga ayaa kelyaha kasoo gala xalfaafyada ka yimaada wadnaha
2. Dhiiga ayaa lagu sifeeyaa shabaq ka kooban malaayiin unugyada yaryar ee dhiiga sifeeya ah
3. Qashinka ayaa ka gudba tuubada kaadida kadibna waxaa lagu kaydiyaa kaadi haysta ayagoo ah kaadi
4. Dhiiga la sifeeyay ayaa ku laabta qulqulka dhiiga asagoo qaadaaya halbawleyaasha
5. Kaadi haysta ayaa buuxsanta kadibna kaadida ayaa ka baxda jirka ayadoo sii marta tuubada kaadi mareenka

Kelyaha ayaa fulinaaya shaqada ilaalinta nafta ee sifaynta iyo ku celinta hawbawleyaasha dhiiga ku dhawaad 200 oo quarts oo dheecaan ah 24 saac oo kastaba. Ku dhawaad labo quarts ayaa laga bixiyaa jirka ayagoo ah aadi, halka cadadka soo haray, 198 quarts, dib loogu cesho jirka. Kaadida aan dhigno ayaa ku jirtay kaadi haysta hal ilaa sideed saacadood.

Wixii xog dheeraad ah, la xariir National Kidney Foundation (Ururka Qaran ee Kelyaha)

Laynka caawimaada bilaashka lagu waco: **855.NKF.CARES** ama iimeelka: **nkfcares@kidney.org**